



Jamhuuriyadda Federaalka
Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiirka

September 20, 2020

Xeerka Nidaaminta Ajuurada Maxkamaddaha (Xeer Lr.0217092020)

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda JFS: -

Markii uu arkay: Xeerka Ajuurada Maxkamaddaha Lr.109, 14 November 1975, iyo Sharciga Maamulka Dakhliga Lr 13. 27/10/2019 Qodobkiisa 6aad.

Markii uu arkay: Baahida baaxada weyn ee loo qabo sare uqaadida iyo dardar galinta Dakhliyada Ujuurooyinka Maxkamadaha.

Markii uu arkay: Dakhli yarida heysa Maxkamadaha Dalka.

Markii uu dhegeystay: Soo Jeedinta Agaasimaha Canshuuraha Beriga iyo Agaasimaha Guud ee Dakhliga.

Waxa uu go'aansaday: Soo saaridda xeerka nidaaminta ajuurada Maxkamaddaha

Qodobka 1aad: Sicirka Ujuurada amma khidmada.

Khidmadan waxaa lagu soo rogay dhammaan Maxkamadaha heerarka kala duwan, wuxuuna noqonayaa sicirkooda sida soo socota:

Maxkamadda Sare		
Lr.	Nooca Adeega	Ujuurada La Saaray
1	Gal-furis Madani	\$200
2	Gal-furis Idaari	\$300
3	Gal-furis dacwad shaqaale	\$50
4	Dib u eegis	\$300
5	Ruqsadda qareenada- marka koowaad	\$500
6	Cusboonaysiin Ruqsad Qareen (sanadkiiba mar)	\$300
7	Gal-furis Dacwad Doorasho	\$1,000
8	Gal-furis Dacwad Dastuuri ah	\$1,000
Maxkamadda Rafcaanka		
Lr.	Nooca Adeega	Ujuurada La Saaray
9	Gal-furis Madani (dacwad katimid gobolka)	\$200
10	Gal-furis Madani (dacwad katimid degmooyinka)	\$30

11	Ansixinta Wakaaladda	\$50
Maxkamadda Gobolka		
Lr.	Nooca Adeega	Ujuurada La Saaray
12	Cashuurta Dacwadda Madaniga ah (halmar)	5%
13	Is-hortaag fulin	\$200
14	Dacwad shaqaale	\$50
15	Fulin	1%
16	Sugnaan Mulkiyad	\$300
17	Diiwaan gelinta shirkadaha	\$500
Maxkamadaha Degmooyinka		
Lr.	Nooca Adeega	Ujuurada La Saaray
18	Shahaadada Furriinka	\$150
19	Shahaadada Guurka	\$50
20	Gal-furis madani/ dhaxal	\$30
21	Wakaalad	\$30
22	dhaxal koob	\$300
23	Dhaxal Qaybin	3%
24	Shufca	1%
25	Wareejin hanti (Aato Beec)	2%
26	Wareejin Hibo (Aato Hibo)	2%
27	Warqad Ogolaansho (Qayim)	\$30
28	Cadayn Waalid/ Xanaaneeye	\$30
29	Cadaymaha yaryar	\$30
Ujuurooyinka Baaqda		
Lr.	Nooca Adeega	Ujuurada La Saaray
30	Wakaalad qareen (halmar)	\$50
31	Shirkad qareen muwaadin ah – (sanadkiiba mar)	\$1,000
32	Shirkad qareen ajinabi ah – (sanadkiiba mar)	\$3,000
33	Ruqsadda qareen ajinabi ah – (sanadkiiba mar)	\$1,000

Qodobka 2aad: Ururinta khidmadda.

Khidmadan waxaa uruurinaaya Shaqaalaha/Saraakiisha Wasaaradda Maaliyada ee ku sugan Maxkamadaha iyo degooyinka gobalka Banaadir.

Qodobka 3aad: Bixinta khidmadda.

Dhammaan Shaqsiyaadka bixinaya Ujuurooyinka waxaa la farayaa in ay ku shubaan lacagahaas qoondaha Dakhliga aan cashuuriga ahayn ee ka furan Bankiga dhexe ee Soomaaliya.

Qodobka 4aad: Xog wadaagista Hey'addaha.

Saraakisha Wasaaradda Maaliyadda iyo Kuwa Maxkamadaha waa in ay la wadaagaan dhammaan macluumaadka Madaxda Wasaaradda iyo Maxkamadaha.

Qodobka 5aad: dhaqan galka xeerkan.

Ugu dambayn xeerkani waxa u dhaqangeleyaa marka u saxiixo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

Mahadsanidiin,



Dr. Cabdiraxmaan Ducaale Beyle
Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

